

Xuquuqdaada Daraasadda

Xaashida Macluumaadka ee loogu talagalay Dadka Kaqeyb Qaadanaya Daraasada Socdaalka ee Qasabka ah

Ka qeybqaadashada mashruuc daraasad ama cilmi-baaris waxay ku siinaysaa fursad codkaaga ama fekirkaaga aad uga dhiibato ama lagu maqlo, laakiin sidoo kale waxay noqon kartaa mid aan kugu habboonayn, oo kugu kaca waqti ama lacag, iyo/ama jir ahaan ama shucuur ahaan ku dareensiiya qalbi-furnaan la'aan. Macluumaadka xaashidan ku qoran waxay sharxaysaa shuruudaha muhiimka ah oo waxayna tilmaamaysaa xuquuqdaada.



Waa iskaa-wax-u-qabso, ogolaansho wargelin

Tani macnaheedu waxay in adiga oo keliya aad go'aan ka gaari kartid haddii aad rabto iyo in kale inaad ka qayb qaadato mashruuc daraasadda. Aan kala qeexno.

Iskaa-wax-u-qabso waxay ka dhigan tahay inaad adigu go'aan ku gaari karto ikhtiyaarkaaga oo adiga aad ikhtiyaarka iska leedahay – iyada oo aan lagugu ciqaabin diidmada ka-qaybgalka iyo oo ayna jirin faa'iidooyin waaweyn (sida lacago badan oo kale) haddii aad oggolaato inaad ka qaybqaadato.

- Laguu ma diidi karo badeeco ama adeegyo diidmada aad diiday in aad ka qaybqaadato darteed.
- Xitaa haddii qof, sarkaal dawladeed, ama urur kugula taliyo inaad kaqaybqaadato cilmi baarista, qasab kuguma ihid in aad ka qaybqaadato. Waxaad wali xaq u leedahay adeegyo iyo khayraad isku mid ah xitaa hadaadan kaqeyb qaadan.

Xog ogaal macnaheedu waa inaad xaq u leedahay inaad ogaato waxa daraasadda ay ku saabsan tahay, waxa lagaa codsanayo inaad sameyso, iyo maxay yihiin faa'iidooyinka iyo halista ka imaan karta ka qeyb qaadashada daraasadda.

- Waa inaad weydiisaa wakhtiga ay qaadan karto daraasadda iyo waxa saxda ah ee adiga lagaa doonayo.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sida cilmi baarista loo wadaagi doono iyo sida aad ku heli karto natiijooyinka cilmi baarista.
- Waxaad xaq u leedahay in macluumaadkan lagugu siiyo luqad aad fahmayso. Waxaad weydiisan kartaa turjumaan ama tarjumaad haddii aad u baahato.

- Cilmi-baaraha waa inuu ku siiyaa macluumaadka lagula xiriirayo ee aad isticmaali karto haddii aad wax su'aalo ah ama walaac ah aad ka qabto. Macluumaadkan lagala xiriirayo waxaa sidoo kale looisticmaali karaa haddii aad rabto inaad ka baxdo daraasadda waqti dambe.
- Waxaad xaq u leedahay inaad su'aalo weydiiso wakhti kasta.

Oggolaansho macnaheedu waa inaad si cad u ogolaatay inaad ka qaybqaadato.

- Cidna kuu ma saxiixo karto iyagoo magacaaga ku hadlaya (marka laga reebo carruurta yaryar ama qaangaarka leh awood garasho xaddidan; hoos ka eeg macluumaadka ku saabsan oggolaanshaha kiisaskan).
- Badanaa, waxaa lagu weydiinsan doonaa inaad saxiixdo foom si rasmi ah aad u muujiso inaad ogolaatay kaqeybqaadashada cilmi-baarista. Waxaad xaq u leedahay inaad foomka kala hadasho qaraabadaada, asxaabtaada, shaqaalaha dejinta, xubnaha bulshada, ama qof kale kahor intaadan go'aansan inaad saxiixdo iyo in kale. Daraasadda waa inay ku siiyaan nuqdi ah foomka aad saxiixday.
- Haddii aad doorbideyso, waxaad weydiisan kartaa inaad ku bixiso oggolaansho afka ah halkii ay qoraal ka ahaan la'hayd. Tan marwalba suurtagal maahan, waxay kuxirantahay shuruudaha guddiga anshaxa cilmi baarista (REB).¹
- Waqti kasta oo aad rabto waad ka bixi kartaa cilmi-baarista—qasab kuma ahid inaad dhammayso daraasadda cilmi-baarista. Haddii aad go'aansato inaad ka baxdo, waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato in macluumaadkaaga midkoodna aan la isticmaalin.
- Sidoo kale waxaad diidi kartaa inaad ka jawaabto su'aal kasta oo gaar ah ama aad ka qayb qaadato qayb kasta oo gaar ah oo ka mid ah cilmi-baarista.

Oggolaansho waxaa loola jeedaa in qofka ka yar da'da qaan-gaarka ama leh awood garasho oo xaddidan uu oggol yahay ka-qaybqaadashada. Marka ay xaaladda sidan tahay, waalid ama mas'uulka waa inuu sidoo kale bixiyaa oggolaansho si ay baaritaanka u sii socoto. Haddaan si kale u iraaqdo, waxay u baahan tahay oggolaansho iyo oggolaansho qof kale.

¹ Guddiga Anshaxa Cilmi-baarista (REB) waa guddi ka socda machadka cilmi-baarista, kaas oo mas'uul ka ah dib-u-eegista mashaariicda cilmi-baarista si loo hubiyo in cilmi-baaraha uu ilaalinayo mabaadi'da anshaxa ee lagu sharraxay dukumintigan. REB waa inay ka shaqeeyaan inay sare u qaadaan xuquuqdaada cilmi baarista.

Xuquuqdaada Daraasadda



Xuquuqdaada asturnaanta iyo xoqta qarsoodiga waxaa loola jeedaa in cilmi-baaraha uusan ku aqoonsan karin adiga ama jawaabahaaga cilmi-baarista adiga oo aan lagaa helin ogolaansho cad. Waxyaabo qaarkood ee laga fekerayo:

Asturnaanta waa qofka inuu xur ka yahay faragalinta ama dhexgal iyo xaq u lahaanshaha xakameynta macluumaadka ku saabsan naftaada.

- Waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato in cilmi baarista lagu qabto meel gaar ah oo amaan ah, halkaasoo dadka kale aysan u muuqan inay ku aqoonsan doonaan ayna ogaan karaan inaad kaqeyb qaadatay daraasadda.
- Waxaad xaq u leedahay inaad doorato inaad rabto iyo inkale in lagugu aqoonsado natiijooyinka cilmi baarista. Xaaladdaha qaarkood, cilmi-baaruhu ma isticmaali karo magacaaga dhabta ah, xitaa haddii aad si cad u weydiiso, maxaa yeelay waxay aqoonsan kartaa kuwa kale ee daraasadda doorbiday inaan la aqoonsan magacooda.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sida loo isticmaali doono macluumaadka ka soo baxa daraasadda.
- Cilmi-baarayaashu waa inay si cad u sharxaan sida aad awood ugu yeelan doonto inaad wax ka barato natiijooyinka daraasadda.

Asturnaanta waa ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed.

- Cilmi-baaraha waa inuu haystaa wado lagu sugayo macluumaadka la ururiyey si dadka kale aysan u helin.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato inta macluumaadkaaga la keydin doono iyo cidda heli doonta.
- Cilmi-baaraha looma oggola inuu qolo seddexaad siiyo ama ka iibiyo.
- Xaaladdaha qaarkood, cilmi-baaraha waxaa laga yaabaa inuu leeyahay waajibaad anshaxeed oo ah inuu shaaca ka qaado macluumaadka ku saabsan is-waxyelaynta ama waxyeellada dadka kale. Foomka ogolaanshuhu waa inuu si cad u muujiyaa xaddidnaanta asturaada. Haddii shaki uu jiro, weydii! Sidoo kale waxaad xaq u leedahay inaad ku adkaysato in aan magacaaga la sheegin (hoos eeg) in aan lagu shaacin dhammaan macluumaadka adiga lagaa uururiyay ee adiga kugu saabsan.

- Xaaladdaha qaarkood, cilmibaaruhu wuxuu yeelan karaa waajibaad sharci oo ah inuu ku wargaliyo bilayska wixii falal dambiyeed ah. Foomka ogolaanshuhu waa inuu si cad u muujiyaa xaddidnaanta asturaada. Haddii shaki uu jiro, weydii! Sidoo kale waxaad xaq u leedahay inaad ku adkaysato in aan magacaaga la sheegin in aan lagu shaacin dhammaan macluumaadka adiga lagaa uururiyay ee adiga kugu saabsan.
- Markii aad ka jawaabeysid rayi-ururinta internetka, waa inaad ogaataa in wixii macluumaad ah ee ku kaydsan server-yada dalal qaarkood, sida Mareykanka, ay dowladdu heli karto. Waxaad xaq u leedahay inaad weydiiso sida cilmibaaruhu u damaanad qaadi doono sirta iyo asturnaanta xaaladdaha noocaas oo kale ah.

Magaca aan la'shaacin macnaheedu waa in aysan jirayn wax macluumaad aqoonsi ah, sidaa darteed natiiyooyinka cilmi-baarista ee gaarka ah dib loogu ma noqon karo shaqsigii jawaabtaas bixiyay.

- Kani waa xalka keliya ee xadka u ah asturnaanta kor lagu falanqeeyay: iyadoo la hubinayo sida macluumaadka loo ururiyo inay ka dhigan tahay in qofna – xitaa cilmi baaraha — uusan garaneynin cidda bixisay macluumaadkaas.
- Haddii xaaladdaada socdaal (immigration status) aan weli la aqoonsan, waa inaad weydiisaa sida cilmi-baarayaashu ay u damaanad qaadi doonaan in macluumaadkaaga aan la qararin. Haddii kale, natiiyooyinka cilmi-baaristu halis ayay ku gelin kartaa.



Waajibaadka cilmibaaraha in uusan waxyeello geysan macnaheedu in fayo-qabkaaga, sharaftaada, iyo amnigaaga marwalba la tixgelinayo.

- Haddii wakhti kasta oo aad dareento wax dhib ah inta lagu jiro hawsha cilmi baarista, waxaad xaq u leedahay inaad u sheegto cilmibaaraha.
- Haddii cilmi-baaraha uu sii wado inuu kuu keeno lur, waa inaad u sheegto qof aad ku kalsoon tahay (saaxiib, xubin qoyska ka tirsan, shaqaale dejin, xubin ka tirsan bulshada) waana inaad la xiriirtaa REB-ga cilmi-baaraha. Macluumaadka lagala xiriirayo waa inuu ku qornaandaa foomka oggolaanshaha. Ama internetka ayaad ka raadin kartaa macluumaadka. Dhamaan jaamacadaha iyo isbitaalada waxay leeyihiin REB ama gudi la mid ah.
- Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si xushmad leh iyo hab maamuus tixgelinnaya dhaqankaaga, diintaada, iyo taariikhdaada qowmiyadeed.